IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 20ka Agoosto 1984 L. 1 r 8

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. kalkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 31 Luulyo 1984, Billad Maar oo Waddaninimo ah lagu Maamuusay J.L. Dhaqane Xaashi Nuur. BOG. 595

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 32 ee 29 Luulyo 1984, Xeer Nidaamiyaha Kulliyadda Culuunta Siyaasadda. » 556

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO 4.784 Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Nuur L. 259 » 612

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 32 taariikh 29 Luuliyo 1984 Xeer Nidaamiyaha Kulliyadda Culuunta Siyaasadda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 48 ee 22.7.82;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in loo dejiyo Xeer-nidaamiye Sharciga lagu dhisay Kulliyadda Culuunta Siyaasadda;

MARKUU ARKAY: Talo soo jeedinta Golaha Dhexe XHKS;

MARKUU TIXGELIYAY: Talada Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-nidaamiyaha soo socda:

QEYBTA KOOWAAD

FASIRAAD

Qodobka 1aad

FAAHFAAHIN

Haddii aan si kale loogu macnayn Xeer-nidaamiyahan, erayada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida mid kasta ku hor qoran:-

XISBIGA: Xisbiga Hanti-wadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

JAAMACADDA: Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed;

W A A X: Waxay la meel joogtaa marka la eego qaabka Jaamacadda Qeyb;

Q E Y B: Waxay la meel joogtaa marka la eego qaabka Jaamacadda Waax;

Ummadda Soomaaliyeed; lambar 72 ee 7da Sitembar 1977;

XEERKA JAAMACADDA: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 93 ee 7da Sitembar 1977;

QEYBTA LABAAD

XARUNTA ASTAANTA IYO ILAALINTA GUUD EE KULLIYADDA

Qodobka 2aad

XARUNTA KULLIYADDA

1. Xarunta Kulliyaddu waxay ahaan doontaa Muqdisho.

2. Kulliyaddu waxay ku lahaan kartaa Macaahid iyo dugsiyo meel kasta oo dalka ka mid ah, marka la dareemo in baahi loo qabo, awoodduna u oggolaato.

Qodobka 3aad

ASTAANTA IYO AFKA WAXBARASHO EE KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay yeelanaysaa astaan caan ah oo loo ekeysiinayo sida uu gooyo Guddiga Kulliyaddu.

2. Afka rasmiga ee Waxbarashada Kulliyaddu waa afka Soomaaliga.

Qodobka 4aad

ILAALINTA GUUD EE KULLIYADDA

1. Ilaalinta Guud ee Kulliyadda waxaa yeelanaya Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS.

2. Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS wuxuu u wakiilan karaa xilka ka saaran Kulliyadda Culuunta Siyaasadda, Hoggaanka Golaha Dhexe

### Qodobka 5aad

### MAAMULKA IYO WAXBARASHADA KULLIYADDA

1. Iyadoo wax loo dhimeyn tilmaamaha qodobka 4aad, waxbarashada Kulliyaddu waxay hoos imaaneysaa Jaamacadda.

2. Maamulka kale sida: hoyga, quudka iyo iwm wuxuu hoos imaanayaa Xisbiga.

## QEYBTA SADDEXAAD

## XUBNAHA KULLIYADDA

### Qodobka 6aad

### BUXNAHA KULLIYADDA

Dhismaha Guud ee Kulliyaddu wuxuu noqonayaa qaabka hoos ku qoran:-

b) Guddiga Kulliyadda;
t) Hormuud;
j) Hormuud ku-xigeen;
x) Waax;
kh) Qeyb.

### Qodobka 7aad

### GUDDIGA KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay yeelanaysaa Guddi ka kooban:-

b) Hormuudka Kulliyadda — Guddoomiye
t) Hormuud ku-xigeenka — Xubin
j) Madaxda Waaxyaha »
x) Madaxda Qeybaha »
kh) Labo xubnood oo ka tirsan Shaqaalaha Waxbarashada oo sanad walba la soo doorto.

d) Kaaliyaha Diiwaan-hayaha oo Xoghaya ka ah shirka oo aan cod ku lahayn

r) Kaaliyaha Buug Xannaaneeyaha.

s) Arday ka wakiil ah Guddiga ardayda Kulliyadda.

sh) Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Kulliyadda.

2. Haddii uu Hormuudku shirka ka maqnaado waxaa beddelaya Hormuud ku-xigeenka.
3. Haddii uu shirka ka maqnaado Kaaliyaha Diiwaanhayaha waxaa hawshiisa fulinaya Buug Xannaaneeyaha.

Qodobka 8aad

XILKA GUDDIGA KULLIYADDA

Xilka Guddiga Kulliyaddu waa:-

1. Fulinta siyaasadda Waxbarashada Kulliyadda iyo go'aannada Xisbiga iyo Dawladda.
2. Inuu qorsheeyo, soona diyaariyo qorshaha deeq waxbarasho iyo siminaarrada Macallimiinta Kulliyadda.
3. Inuu soo qorsheeyo Miisaaniyadda Kulliyadda ee sannadka.
4. Inuu dhiiri-geliyo horumarinta hawlaha cilmi baarista sida: buug-dejinta, tarjumidda, sahan cilmiyeedka, kharajyada looga baahan yahayna ku talo galo.
5. Inuu ka doodo, falanqeeyo wax ka beddelidda iyo wax ku daridda barnaamijka guud ee waxbarashada.

Qodobka 9aad

HORMUUDKA KULLIYADDA

1. Hormuudka Kulliyadda waxaa magacaaba, casila Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeystay talada Golaha Hoggaamada iyo soo jeedinta Hoggaanka

u xil saaran iyo Rektarka Jaamacadda.

2. Qofka jagadaas loo xil saarayo waa in laga xulaa Barfasoorrada, Barayaasha Sare iyo Barayaasha Kulliyadda, wuxuuna xilka haynayaa muddo labo sano ah oo loo cusbooneyn karo.

## Qodobka 10aad

## CASILAADDA HORMUUDKA

Hormuudka Kulliyadda waxaa laga qaadi karaa Xafiiskiisa haddii ay dhacaan arrimaha soo socda:-

a) Ku dhaqan xumo Xafiiseed;

b) Maxkamadda oo ku caddeysay jariimad uu galay;

c) Xilkiisa oo uu ka soo bixi waayo;

d) Dhimmirkiisa oo wax u dhimmaan, guddi takhaatiir ah oo arrimahaas ku shaqo lehna sidaas caddeeyo.

## Qodobka 11aad

## HAWLAHA HORMUUDKA KULLIYADDA

1. Hormuudka Kulliyadda oo mas'uul uga ah arrimaha Kulliyadda xag tacliimeed iyo xag maamul, Rektarka Jaamacadda iyo Hoggaanka u xil saaran ee Golaha Dhexe XHKS, waxay hawshiisu tahay, fulinta siyaasadda waxbarashada iyo siyaasadihii kale ee loo dejiyo Kulliyadda.

2. Hawshiisu waa kuwa ku tilmaaman qodobka 27aad ee Sharciga Jaamacadda.

3. Wuxuu Kulliyadda u masalaa isagoo mar kasta oggolaansho ka haysta Hoggaanka u xil-saaran ee Golaha Dhexe XHKS iyo Rektarka Jaamacadda arrimaha la xiriira heshiisyada Kulliyaddu dhinac ka tahay.

Qodobka 12aad

HORMUUD KU-XIGEENKA KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay yeelaneysaa Hormuud Ku-xigeen, waxaana magacaaba Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeysta talada Golaha Hoggaamada iyo soo jeedinta Rektarka Jaamacadda iyo Hormuudka Kulliyadda.

2. Qofka loo magacaabayo xilkaas waa inuu leeyahay aqoon sare iyo waaya-aragnimo maamul.

Qodobka 13aad

KU-SIME HORMUUD

Haddii ay Hormuudka Kulliyadda ay la soo gudboonaato maqnaasho gaaban ama sabab kaloo iska hor-taagto hawshiisa caadiga ah, waxaa xilkiisa fulinaya Hormuud Ku-xigeenka.

Qodobka 14aad

MADAXDA WAAXYAHA IYO QEYBAHA

1. Madaxda Waaxyaha iyo Qeybaha ee waxbaridda waxaa magacaabaya Rektarka Jaamacadda oo dhegeystay ra'yiga Guddiga Kulliyadda.

2. Madaxda Waaxyaha iyo Qeybaha ee Maamulka waxaa magacaabaya Guddiga Qaabka, iyo Meeleynta ee Golaha Dhexe XHKS oo dhegeystay Ra' yiga Hoggaanka u xil-saaran ee Golaha Dhexe XHKS.

3. Dhammaan Waaxyaha Kulliyadda waxaa ka mas'uul noqonaya xubno ka mid ah Macallimiinta Kulliyadda.

QEYBTA AFARAAD

QAADASHADA ARDAYDA CUSUB EE KULLIYADDA

Qodobka 15aad

HABKA QAADASHADA ARDAYDA

1. Soo gelitaanka Kulliyadda waxaa soo qorsheeya, soona abaabula Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeystay talada Golaha Hoggaamada.
2. Dokumintiga ardayda cusub waa in la gaarsiiyaa bil ka hor bilawga sanad tacliimeedka diiwaanhayaha Guud ee Jaamacadda.

Qodobka 16aad

SHURUUDAHA GELIDDA KULLIYADDA

Shuruudaha gelidda Kulliyadda waa sida hoos ku qoran:-

1. Haysasho Shahaado Dugsi Sare ama mid u dhiganta;
2. Inuu yahay Soomaali;
3. Inuu yahay Xubin Xisbi ama Xubin Ururro Bulsho;
4. Inuu halgan taxana ah oo shan sano ka soo waday Xisbiga, Dawladda ama Ururrada Bulshada;
5. Inuusan ka yarayn labaatan sano;
6. Inuu caafimaad qabo, lixaadkiisuna dhan yahay;
7. Inuu heysto warqadda dhalashada iyo midda sugnaanta.

Qodobka 17aad

KA CAFIN SHURUUDAHA SOO GELIDDA KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay qaadan kartaa arday shisheeye oo marnaba tiradoodu ka badnaan karin shan meelood meel tirada ardayda sanadkaas Kulliyadda loo qaadanayo.

2. Ardayda Shisheeyaha ah waa laga cafin karaa shuruudaha ku tilmaaman qodobka 17aad, marka laga reebo shahaadada dugsiga sare ama mid u dhiganta.

Qodobka 18aad

REEBBANAASHO BEDDAALASHO KULLIYADEED

Ardayga Kulliyadda waa ka reebban tahay inuu u beddesho Kulliyad kale.

Qodobka 19aad

SABABAHA XEENI KARA JIITANKA WAXBARASHADA KULLIYADDA

Ardayna iskiis uma goyn karo waxbarashada Kulliyadda haddii ayna dhicin sababaha soo socda:-

b) Ka saarid xubinnimada Xisbiga iyo Ururro Bulsho;

t) Jirro uu caddeeyo guddi dhakhaatiir ah oo waxbarashadiisa inuu sii wato umasaabaxayn.

j) Dhibaato qoys oo u suurto-gelineyn inuu sii wato waxbarashadiisa, Guddiga Kulliyaddunа hubsaday, kana garaabay;

x) Wixii sababo lama filaan ah oo culayskooda loo arko inay joojin karaan waxbarashadiisa;

kh) Go'aanka ka joojinta waxbarashada ee xarfaha kor ku xusan waxaa wadajir u leh Hoggaanka Golaha Dhexe XHKS wakiishay iyo Rektarka Jaamacadda, go'aankuna waa kama dambeys.

## QEYBTA SHANAAD
## HABKA WAXBARASHADA KULLIYADDA

### Qodobka 20aad

### HABKA WAXBARASHADA KULLIYADDA

1. Wixii ku saabsan sanad-tacliimeedka, habka imtixaanka, raacidda casharrada ee Kulliyadda waxaa lagu dhaqayaa sida ku tilmaaman qaybta shanaad ee Sharciga Jaamacadda.

2. Sidoo kale waxay qiimeynta shahaadada iyo sida loo maamulo ma-gudbayaasha imtixaanaadka kala mid tahay Kulliyadaha kale ee Jaamacadda.

### Qodobka 21aad

### IMTIXAANKA HORDHACA QALIN-JEBINTA

1. Kulliyadda waxaa u sii jiraya imtixaanka hordhaca ah qalin-jebinta (Preluarea) ilaa barnaamijka Waxbarashada dib loogu habeeyo, lana arko inaan loo baahnayn sii jiritaanka imtixaankaas.

2. Ardaygii aan gudbin imtixaanka hordhaca qalin-jebinta uma fariisan karo doodda qalin-jebinta.

3. Ardaygii ku dhaca doodda qalin-jebinta, Guddiga Kulliyadda ayaa u qabanaya muddo aan saddex bilood ka yarayn, kana badnayn lix bilood.

4. Ardaygii ku dhaca hordhaca qalin-jebinta (Prelourea) hal maaddo, waxaa la siinayaa muddo aan ka badnayn bil inuu ku soo diyaariyo maaddadaas.

5. Ardaygii labo maaddo ku dhaca imtixaanka hordhaca qalin-jebinta waxaa loo qabanayaa muddo dambe, ugu yaraan saddex bilood, ugu badnaanna xilliga kaas ku xiga dhammaadkiisa. Haddii marka dambe u suuro-gelin waydo inuu gudbo, wuxuu

dib ugu noqonayaa sanadka waxbarashada oo kaas ku xiga.

6. Haddii sanadka loo oggolaaday ardaygu ka faa'iideysan waayo inuu kaga gudbo imtixaankaas, waa laga joojinayaa waxbarashada Kulliyadda.

## QEYBTA LIXAAD

## ASLUUBTA ARDADA IYO SHAQAALAHA KULLIYADA

### Qodobka 22aad

### GUDDIGA ASLUUBTA EE KULLIYADDA

Ardada Kulliyadda waxaa tallaabo asluubeed ka qaadi kara Guddiga Kulliyadda oo noqonaya Guddiga Asluubta.

### Qodobka 23aad

### AWOODDA GUDDIGA ASLUUBTA EE KULLIYADDA

Guddiga Asluubta ee Kulliyaddu wuxuu ardada ka qaadi karaa tillaabooyinka asluubeed ee hoos ku qoran:-

b) Canaan qoraal ah;

t) Digniin qoraal ah;

j) Ka joojin waxbarashada Kulliyadda muddo aan ka badnayn xilli;

x) Magdhaw waxyeellada ardaygu u geysto hantida Kulliyadda;

kh) Ka joojin imtixaanka xilliga;

d) Ka joojin waxbarashada Kulliyadda muddo aan ka badnayn sanad tacliimeedka;

r) Ka raacdayn Kulliyadda.

Go'aankaas waxaa Rafcaan looga qaadan karaa Qaabka ku tilmaaman Xeerka Jaamacadda Guddiga Sare ee Maamulka Kulliyadda.

## Qodobka 24aad

### FALAAD-XUMIDA IYO CIQAABAHA

Guddiga Kulliyaddu wuxuu ciqaabaha ku xusan qodobka 23aad ee xeerka ugu qaadayaa ardayga sida hoos ku qoran, haddaan falaad-xumadiisu keenayn dembi ka culus:-

1. Ciqaabaha ku sheegan (b) iyo (t) ee qodobka 23aad, waxaa lagu qaadi karaa ardaygii:-
   - i) Casharrada ka maqnaada laba saac oo xiriir ah, sababa waafi ahna keeni waaya;
   - ii) Ka qeyb geli waaya hawlaha tacliinta la xiriira iyo kuwa kale ee Kulliyaddu qaban-qaabiso, lagana doonayo inuu ka qeyb qaato;
   - iii) Saacadaha cashar-qaadashada haddii uu soo qaato dhar aan ahayn kii Kulliyadda.

2. Ciqaabta ku sheegan xarafka (j) ee qodobka 23aad, waxaa lagu qaadi:-
   - b) Ardaygii muujiya caajisnimo cad;
   - t) Ku marti geliya Kulliyadda dad aan joogitaankooda oggoleyn Xeerka Kulliyadda iyo Jaamacadda u degsan;
   - j) Wareejiya, lumiya ama halleeya xaashiyaha rasmiga ah ee Kulliyadda ama Jaamacadda, isagoo lagu aaminay, ama si kale ku soo gaareen;
   - x) Abaabula, hoggaamiya ama ka qeyb gala dhaqdhaqaaq waxyeellaynaya nolosha tacliinta, ama tan bulshada ee Kulliyadda ama Jaamacadda oo dhan;
   - kh) Geli waaya imtixaanka isagoo keenin sabab waafi ah.

3. Magdhawga hantida Kulliyadda waxyeellada loo geysto waxaa la warsanayaa arday kasta oo dhibaato gaarsiiya qalab ka mid ah hantida Kulliyadda.

4. Ciqaabta ku sheegan xarafka (kh) ee qodobka 23aad waxaa lagu xukumi karaa ardaygii:-
   i) Ka soo bixi waaya shuruudaha waxbarashada ee loo qarriray;

   ii) Xada, qiyaana ama ku hela si aan sharci ahayn warqadaha imtixaanka.

5. Ciqaabta ku sheegan xarafka (d) ee qodobka 23aad, ee Xeerkan waxaa lagu qaadi karaa:-
   i) Ardaygii ku gala imtixaanka magac aan ahayn kan ku sajilan imtixaanka;

   ii) Dib u gala dambiyada ku sheegan xarafaha b, t, j, x, ee qodobka 23aad ee Xeerkan.

6. Ciqaabta ku sheegan xarafka (r) ee qodobka 23aad ee Xeerkan waxaa lagu qaadi karaa ardaygii:-

   b) Maxkamadi go'aan kama dambeys ah ka gaarto jariimada uu galay awgeed, ciqaabteeduna ka yarayn saddex sano oo xarig ah;

   t) Ku kaca fal ama falal Guddigu u aqoonsado inuu yahay fawaaxish (Scandal);

   j) Ku kaca arrimo ka soo horjeeda ujeeddooyinka iyo himilooyinka Kulliyadda, si suganna loogu soo caddeeyo.

7. Ardaygii ku kaca fal ama falal Guddiga ugu muuqata inay yihiin dembiyo aan Xeerkani xusayn ama nidaam hoose u goyn ciqaab, waxaa lagu qaadi karaa ciqaabaadkii kale oo Guddiga ugula muuqato inay ku qalmaan dembiga ardaygu galay.

## QEYBTA TODDOBAAD
## HAWL-WADEENNADA KULLIYADDA.

### Qodobka 25aad

### HAWL-HADEENNADA KULLIYADDA

Hawl-wadeennada Kulliyadda waxay ka koobán yihiin hawl-wadeennada waxbarashada, kuwa cilmi-baarista, hawl-wadeennada maamulka iyo dhammaan dadka kale ee hawlo joogto ah ka haya Kulliyadda.

### Qodobka 26aad

### MAGACAABIDDA HAWL-WADEENNADA MAAMULKA IYO WAXBARIDDA KULLIYADDA

Magacaabidda hawl-wadeennada Maamulka iyo kuwa waxbaridda ee Kulliyadda waxaa loo marayaa habka u degsan Xisbiga iyo Jaamacadda.

### Qodobka 27aad

### MUSHAARKA IYO GUNNOOYINKA HAWL-WADEENNADA KULLIYADDA

1. Mushaarka iyo gunnooyinka hawl-wadeennada waxbaridda waxay waafaqsan yihiin Xeerka iyo Nidaamka u degsan Jaamacadda Ummadda.

2. Mushaarka iyo gunnooyinka hawl-wadeennada kale ee Kulliyadda waxay la mid yihiin hawl-wadeennada Xisbiga.

3. Hormuudka, Hormuud Ku-xigeenka, Madaxda Waaxyaha iyo Qeybaha ee Kulliyaddu waxay leeyihiin gunno xil ku siin (Monthly post allowance) bishiiba oo u dheer mushaarooyinka iyo gunnooyinka ay ku qaadan jireen jagooyinka waxbaridda ee ay ka shaqayn jireen magacaabidda ka hore.

4. Gunnooyinka ku xusan lambarka hore ee qodobkan waxay la mid yihiin kuwa Kulliyadaha kale ee Jaamacadda, waxayna ku cad yihiin Xeerka Jaamacadda.

Qodobka 28aad

SHAQAALAHA WAXBARIDDA

Hawl-wadeennada waxbaridda ee Kulliyadda waxaa loo yaqaan xubnaha soo socda:-

1. Hormuud;
2. Hormuud Ku-xigeen;
3. Madaxda Waaxyaha;
4. Madaxda Qeybaha (soo maray Macallinimada);
5. Macallimiinta casharrada ka bixisa Kulliyadda;
6. Cid kasta oo loo xil-saaro hawlo cilmi-baaris;
7. Qof kasta oo loo dhiibo jago oo Guddiga Waxbaradu u aqoonsan yahay jago waxbarid (Academic Post).

Qodobka 29aad

JAGOOYINKA SHAQAALAHA WAXBAIIDDA

1. Jagooyinka hawl-wadeennada waxbaridda ee Kulliyaddu waxay noqonayaan sida soo socota:-
   a) Borofeesor (Professor)
   b) Bare Sare (Senior Lecturer)
   c) Bare (Lecturer)
   d) Bare Kaaliye (Assistanta Lealurer).
2. Shuruudaha magacaabidda, u beddelashada jago iyo dallacsiinta hawl-wadeennada waxbaridda oo ku xusan xubinta sare ee qodobkan waxaa la waafajinayaa Sharciga Jaamacadda Ummadda.

Qodobka 30aad

XULKA HAWL-WADEENNADA KULLIYADDA

Qofka loo qaadanayo, lagu wareejinayo ama loo

dallacsiinayo inuu macallin ka noqdo Kulliyadda:-

b) Waa inuu haysataa shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;

t) Waa inuu oofiyaa shuruudaha waaya-aragnimo iyo kuwa kale oo looga baahdo sida ku cad sharciga Jaamacadda Ummadda.

Qodobka 31aad

MAGACAABIDDA, DALLACSIINTA SHAQAALAHA KULLIYADDA

1. Shaqaalaha waxbaridda magacaabiddooda, dallacsiintooda waxaa iska leh Rektarka Jaamacadda Ummadda, isagoo ka talo qaadanaya Hoggaanka Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS u wakiishay.

2. Magacaabidda iyo dallacsiinta shaqaalaha kale ee Kulliyadda waxaa iska leh Xisbiga.

3. Xisbigu wuxuu awood u leeyahay isagoo mar kasta tixgelinaya talada Rektarka Jaamacadda in qof ka mid ah Shaqaalaha waxbaridda ee Kulliyadda uu u magacaabo xil kale, hase yeeshee markii uu dib ugu soo laabto hawshiisi Kulliyaddu wuxuu kala qabsanayaa halkii uu kaga tegay.

Qodobka 32aad

ASLUUBTA SHAQAALAHA KULLIYADDA

1. Gefka ay galaan shaqaalaha waxbaridda ee Kulliyadda waxaa tallaabo ka qaadiddooda iska leh Rektarka Jaamacadda iyo Hoggaanka Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS u wakiishay.
2. Shaqaalaha kale waxaa tallaabo ka qaadiddooda iska leh Xisbiga oo dhegeystay ra'yiga Hormuudka Kulliyadda.

## QEYBTA SIDDEEDAAD

## MAALIYADDA KULLIYADDA

### Qodobka 33aad

### MIISAANIYADDA KULLIYADDA

Kulliyaddu waxay yeelaneysaa Miisaaniyad u gaar ah oo hoos timaadda maamulkeeda sanadkiiba. Miisaaniyadda waxaa soo diyaariya Guddiga Kulliyadda, waxaana oggolaada Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeystay Golaha Hoggaamada.

### Qodobka 34aad

### ILAHA MAALIYADDA KULLIYADDA

Kulliyadda waxaa maaliyaddu ka soo geli kartaa:-

b) Miisaaniyad Xisbigu sanad walba u jaan-gooyo;
t) Deeq Jaamacadda Ummaddu u fidiso;
j) Deeq Xisbi kale, dawlad, wakaalado, Jaamacado iyo Machadyo ajnabi ah u fidiyaan, taasoo ku xirneyn shuruud.

## QEYBTASAGAALAAD

## QODOBBO KAMA DAMBEYS AH

### Qodobka 35aad

### ARRIMAHA WAXBARASHADA EE KULLIYADDA

Arrimaha waxbarasho oo aan si cad ugu xusnayn

### Qodobka 36aad

### DHAQAN — GAL

Xeer Nidaamiyahan waxaa lagu nidaaminayaa Sharciga iyo Xeerka Jaamacadda Ummadda.

Xeer Nidaamiyahani wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 29 Lug. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S,

Sharci Lambar 39 taariikh 20.10.84. Awood u siin Madaxweynaha J.D.S. Fidin Cafis Guud.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey in Munaasabadda 15 Guurada Kacaanka 21ka Okt. 1969 ku bixiyo Cafis Guud. Xagga Dambiyada iyo C/ha.

2. Waxaa kale oo awood loo siiyey in uu xaddido Dambiyada cafisku uu saameyn karo, isagoo tixgelinaaya habboonaanta, Nabadgelyada iyo badbaadada B/da.

3. Cafiska waxaa ka faa'ideysan kara eedeysanayaasha iyo Xukun sanayaasha dambiga galay inta ka horeysa 13ka Oktoobar 1984.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamh riyadda.

Muqdisho, 20 Okt. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre